

Tallaallada COVID-19

Su'aalaha Badanaa La waydiiyo ee loogu Talagalay Waalidiinta, Masuuliyiinta, iyo Dhallinta jira 12-17 sano ee u Qalma Talaalka Pfizer

Su'aal: Majiraan talaallo ay qaadan karaan carruurta ama dhallinta?

Jawaab: Haa. Maraykanka, hal talaal oo COVID-19 waxaa ansixiyay Maamulka Cuntada iyo Daawada Maraykanka (FDA) oo loogu talagalay inay isticmaalaan dadka jira 12 sano iyo kasii wayn – talaalka Pfizer. Talaalka Pfizer waxa uu leeyihiin mid kamid ah xarumaha tijaabooyinka caafimaadka ee ugu wayn, oo ay ka qaybqaataan in ka badan 43,000 oo mutadawiciin. Talaallada kale ee la heli karo, Moderna iyo Johnson & Johnson, waxaa hadda loo oggolaaday inay qaadan karaan dadka jira 18 sano iyo kasii wayn.

Su'aal: Oggolaanshaha waalidka/masuulka maloo baahan yahay?

Jawaab: Haa. Carruurta da'doodu ka yartahay 18 sano oo wali masuulka laga yahay waa inay helaan oggolaanshaha waalidka ama masuulka sharciga marka ay qaadanayaan talaal kasta. Waalid ama masuul sharci waa inay caadigan soo raacaan ilmaha yar marka uu qaadanaayo talaalka, ilaa iyo in qaadashada talaalka lagu qaadanaayo mahee xaafiiska dhaqtarka, xarumaha caafimaadka iskuulka ama xarumaha xariirka la leh iskuulka ama xarumo kale oo lamid ah.

Su'aal: Talaallada COVID-19 ma leeyihiin waxtar iyo badqab?

Jawaab: Haa, Talaallada COVID-19 waxay leeyihiin waxyar iyo badqab. Sida ku xusan FDA, tijaabada [caafimaadka ee talaalka Pfizer](#) ee loogu talagalay da'aha 12-15, Majirin wax xaaladood COVID-19 ah oo laga diiwaangeliyay 1,100 oo ah carruurta qaatay talaalka Pfizer, iyo 16 xaaladood oo ku saabsan 1,100 oo carruur ah oo kujira kooxda placebo. Tijaabada waxaa sidoo kale lagu oggolaaday in dhallinta qaatay talaalka inay leeyihiin antiboodhi aad u badan oo jirkooda kujira, oo muujinaysa inay yeesheen nidaamka difaaca jirka oo adag.

Su'aal: Muddo intee le'eg ayuu qaataa in talaalku shaqeeyo?

Jawaab: Talaalka Pfizer waa talaal leh taxane labo kuuro ah. Kuurada labaad waxaa la qataa kadib 21 maalmood (saddex asbuuc) kadib marka la qaato kuurada koowaad. Labada kuurada waa muhiim in la qaato si loo helo badqabka ugu wayn. Qofka waxaa loo arkaa inuu si buuxda talaalka u qaatay labo asbuuc kadib kuurada labaad.

Su'aalaha: Waa maxay saamaynta caafimaad darada kale ee talaalada COVID-19?

Jawaab: Waxyeellooyinka caafimaad daro ee ugu badan waxaa kamid ah xanuun, nabaro cassaanaah, ama barar ka dhasha meesha qofka laga duray; qandho iyo/ama qaboow; madax xanuun; daal; iyo xanuunka kalagoosyada ama murqaha ah. Waxyeellooyinkaas caafimaad daro waa iska caadi waana astaan muujinaysa in jirkaagu dhisaayo nidaam difaac oo ka dhan ah COVID-19. Waxyeellooyinka caafimaad daro waa kuwo sii jiraaya maalmood kooban, wayna sii badan karaan kadib marka la qaato kuurada labaad.

Su'aal: Talaalka COVID-19 ma badelayaa DNA da qofka?

Jawaab: Maya. [Talaallada COVID-19](#) waxba kama badelayaan DNA da qofka. Talaalka Pfizer talaalka fariin sidaha RNA (mRNA). Waxay jirka siyaan tilmaamo si uu u abuurro borotiin aan waxyeelo lahayn ama "badan" oo laga helo fayraska sababa COVID-19; jirka ayaa jawaab celin sameeya asagoo abuuraaya antiboodhi burburinaaya borotiinka.

Su'aal: COVID-19 miyaa lagu beeraa dadka ayadoo la adeegsanaayo aalada raadraaca ee mikrojiibo?

Jawaab: Maya. Cirbadaha talaalka kuma jiraan raadraaca mikrojiibo.

Su'aal: COVID-19 miyuu sababaa ma dhalaysnimo, ama miyuu saameyn ku yeeshaa dhalmada ilmaha ee mustaqbalka?

Jawaab: Maya. Waqti xaadirkaan majiraan wax talaalo ah oo muujinaayo, ayn kujiraan talaalada COVID-19, inay sababaan ma dhalaysnimo.

Su'aal: Sideen u qabsadaan balan? halkee dhallinta lagu talaali karaa?

Jawaab: Waxaa jira boqolaal xaruumood oo dhallinta lagu talaali karo kuna yaala guud ahaan gabalka, oo ay kamid yihiin xaafiisyada,

xarumaha caafimaadka, waaxaha caafimaadka ee deegaanka, isbitaalada, xarumaha caafimaadka bulshada, iyo meelo kale oo badan. Hase yeeshee, waalidka haysta ilmo jira 12 sano waa in lagulo taliyo sababo la xariira sharciga gobalka, carruurta jira 12 ama kasii yar waa qasab inay haystaan qoraal dhaqtar si ay talaalka oga qaataan farmashi; waxay talaalka ka qaadan karaan meel [kasta](#) oo aan ka ahayn farmashi. Dhallinta jira 13 sano ama kasii wayn uma baahna qoraal dhaqtar si ay u qaataan talaalka, waxayna talaalka COVID-19 ka qaadan karaan farmashi ama xarun kasta oo kale oo bixisa talaalka lagu qoray bartaana hot.coronavirus.ohio.gov. Sharciga ilmaha jira 7-12 sano u oggolaanaya inay qaataan talaalka COVID-19 ama talaalka hargabka ka qaataan farmashi ayagoon haysan qoraal dhaqtar waa xaniban yahay. Qoraalada dhaqtarka ayaa wali la iska raba si ilmaha da'daan jira u qaataan dhammaan talaalada. Xubnaha Guriga wakiilada Ohio iyo senatarada Ohio waxay meel mariyeen biilka. Si degdeg ah ayuuna u dhaqan gelayaa.

Su'aal: Maxay tahay inuu sameeyo ilmahaygu kahor balanta talaalka?

Jawaab: Waa inay wax cunaan biyana cabaan kahor inta aysan qaadan talaalka. Tani waxay si gaar ah muhiim ugu tahay carruurta iyo dhallinta sababtoo ah [miyir beelid kadib marka la qaato talaalka ayaa ah astaan inta badan lagu arko dhallinta, waxayna badanaa keentaa walaac ama oon badan](#). Qaado nasasho badan habbeenka ka horeeya balanta talaalkaaga haddii ay macquul tahay. Xiro shaati gacmo gagaaban ama mid aan gacmo lahayn si ay u banaanaato qaybta kore ee gacanta. Haddii ay tahay maalin qaboow, xiro funaanada dhaxanta ama jaakad si fudud loo furi karo.

Su'aal: Maxaan sameeyaa haddii ilmahaygu dareemaayo walaac?

Jawaab: U sheeg ilmahaaga inuu si degan oo hoose u qaato neef kahor inta aan lagu durin cirbada kana fakar wax uu ku raaxaysanaayo. Ka ilaali inuu fiiriyo siliingaha, jilci gacanta uu ka qaadanaayo cirbada. Waalidiintu [waxay sameyn karaan tallaabooyin fudud si ay ilmahooda oga caawiyaan qaadashada talaalka iyo sidii ay u yareen lahaayeen walaaca](#). Waalidiinta waxay dejin karaan walaaca ilmahooda ayagoo xasuusinaaya inay qaataan neef qoto dheer ama mashquulinaaya inta ay qaadanayaan talaalka.

Su'aal: Waxaan warbaahinta bulshada ku arkay warar badan oo la isla dhexmaraayo kuna saabsan talaallada. Sideen ku oggaan karaan waxa runta ah?

Jawaab: Interneetka waxaa ka buuxa macluumaad aan sax ahayn oo halis ah kuna saabsan talaalladan COVID-19, way adkaan kartaa in la oggaado midka la aamini karo. Arrinta ugu wanaagsan ee aad sameyn karto waa inaan aqoon u yeelato tallaalada aadna macluumaadka ka hesho illo la aamini karo. Wax badan ka baro sida [helida macluumaadka oo lagu kalsoonaan karo warbixintaan DCD](#). Kala saar xaqiiqooyinka iyo quraafaadka kuyaala [boggaan Waaxda Caafimaadka Ohio](#).

Ma qabtaa su'aalo badan oo ku saabsan COVID-19?

[Su'aalaha badanaa La waydiiyo](#) | [Quraafaadka iyo Xaqiiqooyinka](#) | [Waxa ay tahay in lala socda kahor, inta lagu jiro, iyo kadib qaadashada talaalka COVID-19](#)

Waxaa la cusbooneysiisay Maayo 12, 2021.